Mahad waxaa iska leh ilaaha xaqqa lagu caabudo, asiga keligii ayaa ka hufan xumaan oo dhan, waxyaabaha ugu horeeyo ee aan Alle uga mahdinayno waa in uu inagu hanuuniyay Islaamnimo, islaamnimaduna waa hoggaansamid iyo isdhiibid, Alle rusul ayuu soo diray, kutubana wuu soo dejiyay, kutubbadaas waxyaalaha ay kadigayeen – marka laga tago shirkiga iyo in naf si dulmi ah loo gooyo – waxaa kow noqonaya sinada, waxa uuna Alle yiri ha u dhawaannina.

Culimada muslimiinta gaar ahaan kuwaa fuqahada ah waxay ay dejijeen qaacidda loo yaqaan 'Sad Al-daraa'ic' oo ah in la awdo wassiilo walba oo mafsaddo keeni karto, sida in ay ragga iyo dumarka isla khalwoodaaan. Alle wuxuu xaasaskii Rasuulka "salawaatu Rabbii wa salaamuhu calayh" uu faray in aynan hadalkoodu jilcin, sababtana wuu raaciyay oo wuxuu yiri waxaa damac ku beermayo kii qalbigiisa bukay, wixii damaca dhalin lahaa ayuu Alle reebay in la sameeyo.

Sidaas awgeed haddii ragga laga helo kuwa hadalka u jilciya dumarka, dumarkana laga helo kuwa qalbigooda buka oo hadal loo jilciyay awgiis uu ku beermayo damac shahwaani ah, nahyigu wuxuu noqonayaa mid labada jinsiba shamliyo.